IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

Sannadka 14aad Muqdisho 15ka Feberaayo 1986 L. 1 R 2

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAX

جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 6 ee 2 Feb. 1986, Dib u dhisidda Warshadda Caanaha ee Xamar. Bog; 91

SHARCI L. 7 ee 2 Feb. 1986, Dib u habaynta Mihnadda Notaayada. » 101

SHARCI L. 8 ee 3 Feb. 1986, Aansixin Sharciyada la soo saaray 1.7.85 ilaa 2.1.86. » 103

### QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER - SHARCI L. 1 ee 2 Feb. 1986, Wax ku kordhinta Sharciga Dabar-goynta Qaadka. » 104

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.1.86, Lumid Buug - Kayd L. 16362 ku qoran Maxamed Cali Abti L. 49 » 107

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 4.2.86, Lumid Jeeg War. L. 0202978 ku qoran Cabdullaahi Cail Maxamed L.50 » 108

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 4.2.86, Lumid 2 Jeeg War. L. 0401556-0401276 ku qoran Caasha Saciid Yuusuf L. 51 » 109

WARSHADDA MARMARKA ISMA, Ogeysiis Fadhi Caadi ah L. 52 » 110

MAXKAMADDA G. W/GALBEED. 21.1.86. Lumid Jeeg War. L. 633978 ku qoran P.P. SHARMA L. 53 » 111

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 10.2.86 Lumid Jeegag War. L. 0471109-0471110-0471112 ku qoran Raxma Maxamuud Maxamed L. 54 » 112



QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 6. taariikh 2 Feb. 1986: Dib u dhisidda Warshadda Caanaha ee Xamar.

MADAXWaaYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QAYBTA KOOWAAD

MABAADI' GUUD

Qodobka 1aad

Dhismaha

1. Waxaa dib loo dhisay Warshadda Caanaha ee Xamar.

2. Warshaddu waa hay'ad madax bannaan waxayna leedahay jiritaan sharci ah.

3. Warshadda waxaa lagu meeleeyey darajada (B) waxayna yeelaneysaa dhammaan xuquuqda ay darajadaasi leedahay.

Qodobka 2aad

Micneyn

Haddii aan Sharcigan gudihiisa si ka duwan loogu tilmaamin, erayada soo socda waxaa loola jeedaa micnaha mid kasta ku hor qoran:

WARSHADDA: Warshadda Caanaha ee Xamar;
WASIIRKA: Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga;
GUDDIGA AGAASINKA: Hay'adda ugu sarreysa hoggaaminta maamulka iyo maareynta Warshadda ee ku tilmaaman Qodobka 7aad ee Sharcigan;

GUDDOOMIYAHA: Guddoomiyaha Guddiga Agaasinka ee Warshadda.

Qodobka 3aad

Ilaalinta Sare

1. Ilaalinta Sare ee Warshadda waxaa leh Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

2. Wasiirku wuxuu kaloo Warshadda ku leeyahay awoodaha ku tilmaaman Sharcigan iyo Sharciyada kale ee nidaamiya Hay'adaha Madax bannaan. wuxuuna u soo marinayaa go'aannadiisa iyo tilmaamihiisa Guddiga Agaasinka.

Qodobka 4aad

Xarunta

Xarunta Warshaddu waa Muqdisho waxayna Laamo ka furan kartaa Degmooyinka Dalka.

Qodobka 5aad

Ujeeddooyinka

Ujeeddooyinka Warshaddu waa kuwa soo socda:

— In ay uruuriso caanaha ceeriin ee Dalka laga soo saaro, warshadeyso una qaybiso Dadka isticmaala iyadoo ku siinaysa sicir go'aan;

— In ay dhiirrigeliso beeraha lagu dhaqo lo'da caanaha, horumarisana soo saarka caanaha iyo waxyaabaha caanaha laga soo saaro ee Dalka gudihiisa iyo in ay sahmiso suurtagalnimada dhoofintooda;

— In ay horumariso kuna baahiso Dalka gudihiisa isticmaalka caanaha Warshadda iyo waxyaabaha caanaha laga helo;

— In ay si wax ku ool ah u gaarsiiso wax soo saarka Wrashadda heerka ugu wacan uu gaari karo muggeedu.

QAYBTA LABAAD

QAABKA DHISMAHA

Qodobka 6aad

Xubnaha Warshadda



1. Warshaddu waxay yeelaneysaa Xubnaha soo socda:
— Guddiga Agaasinka;
— Guddoomiyaha;
— Maareeyaha Guud iyo
— Guddiga Maamulka.

2. Guddoomiyaha iyo Maareeyaha Guud waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka.

Qodobka 7aad

Guddiga Agaasinka

1. Guddiga Agaasinka waxa uu ka kooban yahay Xubnaha soo socda:

| | |
|---|---|
| — Guddoomiyaha Guddiga Agaasinka | Guddoomiye; |
| — Wakiil ka socda Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga | Xubin; |
| — Wakiil ka socda Wasaarahda Maaliyadda | Xubin; |
| — Wakiil ka socda Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa | Xubin; |
| — Maareeyaha Guud ee Warshadda | Xubin, Xoghaye. |

2. Wakiillada ka socda Wasaaradaha darajadoodu waa in ayan ka yarayn Agaasime Waaxeed.

Qodobka 8aad

Xilalka Guddiga Agaasinka

1. Guddiga Agaasinku wuxuu qabanayaa xilalka soo socda:

a) In uu oggolaado ku talo galka miisaaniyadda caadiga ah iyo xisaabxirka Warshadda ka hor inta aan loo gudbin Wasiirka;

b) In uu darso warbixinnada muddada leh ee ku saabsan heerka maaliyadda ee Warshadda, tilmaanna uu ka baxsho;

t) In uu oggolaado qorshaha iyo hab-raaca hawlgalka, qiimeeyana wax qabadka Warshadda;

j) In uu dejiyo barnaamijka dhoofinta waxyaabaha ay Warshaddu soo saarto ee ka bata isticmaalka gudaha;

x) In uu go'aan ka gaaro. isagoo haysta oggolaashaha Wasiirka, maalgelinta Warshaddu ay sameyneyso;

kh) In uu dejiyo siyaasadda shaqo- siinta isagoo tixgelinaaya baahida. awoodda dhaqaale ee Warshadda iyo Sharciga;

d) Xilalka kale ee Sharcigan gudihiisa lagu siiyey.

2. Guddiga Agaasinku wuxuu awood u leeyahay in uu Guddoomiyaha u wakiisho xil ka mid ah xilalka Qodobkan ku tilmaaman.

Qodobka 9aad

Shirka Guddiga Agaasinka

1. Guddigu wuxuu shirayaa. ugu yaraan, saddexdii biloodba mar.

2. Guddigu wuxuu kaloo yeelan karaa shirar aan caadi ahayn.

3. Guddiga waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda Shirku uu qabsoomayo.

4. Saddex meelood meel Xubnaha Guddigu waxa ay weydiisan karaan Guddiga Agaasinka in uu shir isugu yimaado. Guddoomiyuhu waa in shirkaas qabtaa 21 maalmood gudahooda laga billaabo taariikhda helitaanka codsiga.

5. Fadhiyada Guddigu waxa ay ku ansaxayaan marka ay ka soo qayb galaan aqlabiyadda Xubnuhu.

6. Qofka Guddiga Xubin ka ah oo ka tirsan maamulka Warshadda xaq uma laha codbixin.

7. Go'aannadu waxa ay ku ansaxayaan hal dheeri Xubnaha Guddiga. Ha yeeshee haddii codadku ay isla ekaadaan, waxaa la raacayaa dhinaca Guddoomiyuhu uu u codbixiyey. Go'aannada la gaaray waa in iyagoo qoraal ah lagu gaarsiiyaa Xubnaha 10 beri gudahooda laga billaabo taariikhda la guddoonsaday.



8. Haddii Guddoomiyuhu uu maqnaado, waxaa shir-guddoomiye noqonaya Xubin ka tirsan Guddiga Agaasinka oo leh xaq codbixin oo Guddigu iska dhex doorto.

Qodobka 10aad

Guddoomiyaha

Guddoomiyuhu wuxuu qabanayaa xilalka soo socda:

a) Xiriirinta, haddii loo baahdo, Xubnaha Guddiga iyo Maareeyaha Guud;

b) Masalaadda Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga;

t) Masalaadda Warshadda dhinacyada saddexaad;

j) La socodka iyo hubinta xaqiijinta himilooyinka Warshadda, go'aannada Guddiga Agaasinka iyo habsami u socodak hawlgalka Warshadda;

x) Hawlaha kale ee Guddiga Agaasinku u xilsaaro.

Qodobka 11aad

Maareeyaha Guud

Maareeyaha Guud waa Madaxa fulinta hawlaha Warshadda wuxuuan mas'uul ka yahay maamulkeeda iyo arrimaha hawlmaalmeedkeeda isagoo raacaya Sharciga, go'aannada Guddiga Agaasinka iyo tilmaanta Wasiirka. Gaar ahaan wuxuu qabtaa hawlaha soo socda:

— Xaqiijinta himilooyinka Warshadda iyo hoggaaminta hawlaheeda;
— Horumarinta wax soo saarka iyo kormeerka tayada tacabka;
— Horumarinta habka dayactirka qorsheysan iyo abaabulka iibka iyo suuqaynta oo uu ku jiro dibed u dhoofinta;

— Dejinta hab qaybin oo habboon;
— Soo hordhigga Guddiga Agaasinka qorshaha hawlgalka sannadka;
— Soo hordhigga Guddiga Agaasinka miisaaniyadda ku talo galka iyo midda xisaabxirka;
— Haynta buugagga xisaabaha ee Warshadda;
— Hawlgelinta, maamulka iyo qiimeynta Shaqaalaha Warshadda.

Qodobka 12aad
Guddiga Maamulka

Guddiga Maamulku waxa uu ka kooban yahay Xubnaha soo socda:

— Maareeyaha Guud;
— Maareeyaha Farsamada iyo
— Maareeyaha Lacagta iyo Maamulka.

Qodobka 13aad
Xilalka-Guddiga Maamulka

Guddiga Maamulku waxa uu kala taliyaa Maareeyaha Guud arrimaha soo socda:

a) Dejinta habraaca iyo qorshaha arrimaha la xiriira farsamada, maaliyadda iyo maamulka ee Warshadda;

b) Diyaarinta miisaaniyadda ku talo galka iyo xisaab xirka sannadka;

t) Dejinta qorshaha hawlaha Warshadda iyo qiimeyntooda;

j) Diyaarinta warxibinnada muddada leh ee loo gudbinayo Guddiga Agaasinka, kuna saabsan maaliyadda Warshadda;

x) Dejinta qorshaha horumarinta wax soo saarka;

kh) Dejinta hababka lagu ilaaliyo laguna kormeero xisaabaha Warshadda iyo sicirka;



d) Dersidda talooyinka la xiriira shaqo qorista iyo mushaarka Shaqaalaha ee la hor dhigayo Guddiga Agaasinka;

r) Dersidda talooyinka ku saabsan ku talo galka hantida iyo maagelinta Warshadda ee la hor dhigayo Guddiga Agaasinka.

QAYBTA SADDEXAAD
HANTIDA

Qodobka 14aad
Raasumaalka Warshadda

Raasumaalka Warshaddu waxa uu ka kooban yahay:

1. Lacagta ay Dawladdu u qoondeysay in lagu wado hawlaha Warshadda iyo mashaariicdeeda;

2. Hantida guurta ah iyo midda maguurtada ah ee Warshadda;

3. Dakhliga ka soo gala Warshadda hawlaheeda, mashaariicdeeda iyo adeegyada ay qabato;

4. Deymanka Warshaddu ay qaadato;

5. Deeqaha iyo kaalmada Wrashaddu ay ka hesho Dalka gudihiisa ama dibeddiisa.

Qodobka 15aad
Miisaaniyadda

1. Sannad miisaaniyadeedka Warshaddu wuxuu bil laabanayaa 1da Jannaayo wuxuuna dhammaanayaa 31ka Disember ee sannad walba.

2. Inta ka horreysa 1da Oktoobar, Maareeyaha Guud waa in uu soo diyaariyaa miisaaniyadda ku talo galka ee sannadka cusub wuxuuna u soo gudbinayaa Guddiga Agaasinka.

3. Guddiga Agaasinku wuxuu go'aan ka gaarayaa miisaaniyadda la soo hordhigay inta ka horreysa 15ka Nofember waxaana loo gudbinayaa Wasiirka Warshadaha iyo Wasiirka Maaliyadda si loo ansixiyo.

4. Ilaa iyo inta ay Warshaddu ka taabbagaleyso, dakhliga miisaaniyadda waxaa ka mid naqanaya faa'iidada la helay oo loo isticmaalayo horumarinta helitaanka caanaha ceeriin iyadoo mudnaan la siinayo beeraha yaryar ee lo'da caanaha.

Qodobka 16aad
Xisaabxirka

1. Sannad kasta, inta ka horreysa 1da Abriile, Maareeyaha Guud wuxuu sameynayaa xisaaxirka miisaaniyadda sannadkii la soo dhaafay wuxuuna u gudbinayaa Guddiga Aaagsinka.

2. Isla markaas Maareeyaha Guud wuxuu nuqul xisaabxirka ah u gudbinayaa Guddiga Hantidhowrka ee Warshadda.

3. Guddiga Hantidhowrku wuxuu xisaabxirka soo raacinayaa warbixin tifaftiran oo ku saabsan habsamida loo maamulay dakhliga iyo kharajka.

4. Haddii Guddiga Hantidhowrku uu isku khilaafo warbixinta, Hantidhowre kasta wuxuu diyaarinayaa warbixin u gaar ah, warbixinnada oo idilna waxaa la hor dhigayaa Guddiga Agaasinka.

5. Guddiga Agaasinku, isagoo dhegeystay warbixinnada Hantidhowrayaasha, wuxuu gogolaanayaa xisaabxirka.

6. Xisaabxirka waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda si loo waafajiyo habka iyo nidaamka u degsan xisaabxirka Hay'adaha Dawladda.

Qodobka 17aad
Guddiga Hantidhowrka

1. Warshaddu waxay yeelaneysaa Guddi Hantidhowr oo ka kooban Guddoomiye iyo laba Xubnood.

2. Hantidhowrayaashu waa in ay ahaadaan khubaro ku xeeldheer xisaabaadka iyo maamulka waxaana magacaabaya Guddiga Agaasinka isagoo dhegeystay soojeedinta Guddoomiyaha.



3. Xubnaha Guddiga Agaasinku kama mid noqon karaan Hantidhowrayaasha Warshadda.

4. Muddada xilka ee Xubnaha Guddiga Hantidhowr ka waa laba sano, dibna waa loo magacaabi karaa.

5. Hantidhowrayaashu waxay yeelanayaan gunno waxaana qiimaheeda xaddidaya Guddiga Agaasinka.

Qodobka 18aad
Awoodda Hantidhowrka

1. Guddoomiyaha iyo Xubnaha kale ee Guddiga Hantidhawrka waxay awood u leeyihiin, wadajir ahaan iyo midmidba, in ay daalacdaan diiwaannada xisaabaha Warshadda iyo qoraallada kale ee xisaabaha khuseeya.

2. Waxay kaloo awood u leeyihiin in ay weydiistaan caddeynta iyo wargelinta ay lagama maarmaan u arkaan.

3. Maamulka Warshaddu waa in uu u suurtageliyaa hantidhowrayaasha gudashada xilalkooda.

4. Xubnaha Guddiga Hantidhowrku waa ay ka qayb gelayaan fadhiyada Guddiga Agaasinka waxayna doodaha furan ka qaadan karaan hadal, ha yeeshee xaq uma laha cod.

5. Hantidhowrayaashu si wadajir ah ayay mas'uul uga yihiin magdhowga khasaaraha Warshadda kala soo gudboonaada gudasho la'aanta xilkooda.

QAYBTA AFRAAD
QODOBBO GEBA-GEBO AH

Qodobka 19aad
Xeer-nidaamiye

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, isagoo dhegestay soojeedinta Wasiirka, wu xuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye dhammeystiraya, habeynayana habsami u fulinta Sharcigan.

Qodobka 20aad
Burrin

Waxaa la baabi'iyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qodobka 21aad
Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla markaa uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Feb. 1986

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)



Sharci lambar 7, taariikh 2 Feb. 1986: Dib u habeynta Mihnadda Notaayada.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Mihnadda Notaayada waxaa lagu dhaqayaa Sharciga lambar 8 ee 15.2.1961 iyo Xeerka-tashriiciga lambar 1 ee 2.3.1962.

Qod. 2aad

Iyagoo Sharciyada kor ku tilmaaman ay sidooda u taagnaanayaan, Madaxweynaha JDS, dhegeysiga soojeedinta Wasiirka Gasroorka iyo Arrimaha Diinta kaddib, wuxuu Notaayo u magacaabi karaa, imtixaan la'aan, qof xagga aqoonta gaarka ah ee mihnadda Notaayenimada, khibradda iyo waayo arganimada uu leeyahay dartood loo gartay inuu mudan yahay xilkaas in uu qabto.

Qod. 3aad

1. Sharciyaqaannada ka tirsan Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ee dhaqangalka Sharcigan ka hor hayey xil Notaayo, waxaa u furan in ay shaqada notaayenimada sii wataan iyagoo tan Dawladda istiqaalo ka keenaya ama ay ku laabtaan Wasaaraddooda

2. Kala doorashada labada fursadood waa in ay ku dhacdaa muddo lixdan maalmood gudahood ah, laga billaabo maalinta Sharcigani uu dhaqan galo.

Qod. 4aad

Khidmadda Notaayuhu uu ku yeelanayo hawlaha uu qabto waxaa lagu xaddidayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

Qod. 5aad

Waxaa la baabi'iyey Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 6aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Feb. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)



Sharci lambar 8, taariikh 3 Feb. 1986: Ansixin Sharciyada la soo saaray 1.7.1985 ilaa 2.1.1986;

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA : Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la ansixiyay Sharciyada soo socda:-

1. Sharci lam. 18 ee 31 Luulyo 1985: «Oggolaansho Afrikaanka ee xuquuqda Aaamigd iyo Dadyowga»;
2. Sharci lam. 19 ee 30.9.1985: «Dhismaha Mashruuca Horumarinta Bombelmada»;
3. Sharci lam. 20 ee 30.9.1985: «Is-beddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1985»;
4. Sharci lam. 21 ee 30.1.1985: «U rogid Sharci Xeer-Sharci lam. 4 ee 15.8.85, Wax ka beddelidda Sharciga Nidaamka Dhismaha Dawladda»;
5. Sharci lam. 22 ee 2.11.1985: «Dhismaha Rugta Ganacsiga»;
6. Sharci lam. 23 ee 3.11.1985: Sharciga Kalluumeysiga Soomaaliyeed»;
7. Sharci lam. 24 ee 24.12.1985: «Oggolaansho Heshiiska fududeynta iyo horumarinta is-dhaafsiga Ganacsiga ee ka dhexeeya Dowladaha Carbeed»;

Qod. 2aad

Ansixintan waxay dhaqan geleysaa laga billaabo 3.1.1986, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3 Feb. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer-Sharci lambar 1, taariikh 2 Feb. 1986: Wax ku kor-dhin Sharciga Dabar-goynta Qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disembar 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Keer-sharci lambar 2 ee 18ka Maarso 1983 oo loo rogay Sharciga lambar 4 taariikh 13ka Abriil 1983 iyo beddelaadyadii ka dambeeyey, kuna saabsan Xaaraantimeynta Qaadka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU TIXGELIYAY: Waaya-aragnimadii lala kul may tan iyo markii qaadka la mamnuucay;

MARKUU TIXGELIYAY: In qaadku uu weli soo gelayo Gobolladа Dalka qaarkood, haba ku kala bateene;

MARKUU ARKAY: In ay wax ka taagan yihiin dhibaatooyinkii bulsho, dhaqaale iyo nabadgelyo ee saldhigga u ahaa mamnuucidda qaadka, weliba ay sii muuqato in qaadku u adeegayo cadawga Ummadda Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in la qaado tallaabo kasta oo loo arko in ay xoojineyso himilada dabar-goynta qaadka, sababtaas darteedna wax lagu kordhiyo Shuruucda hadda jirta, loona adeegsado wax ku kor-dhintan Xeer-Sharci oo durba dhaqan galo, baahida deg degga ah oo ay arrintani leedahay darteed;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Sharci ee soo socad:-

Qod. 1aad

Si loo xoojiyo awoodda hawl-galka hay'adaha ku hawlan dabar-goynta qaadka, Gaadiidka qaadka lagu qabto waxaa lagu wareejinayaa, Xukun Maxkamadeed kaddib, Hay'adda soo qabata waxaana u xil saaran wareejinta Guddiga Nabadgelyada ee Gobolka.



Qod. 2aad

Ganaaxa iyo wixii lacag ah ee ka soo baxa dembiyada qaadka, marka laga reebo qeybaha abaal-gudka ee ku tilmaaman qodobka 11aad, Xeer-sharci lambar 4 ee 18ka Maajo 1984, waxaa lagu wareejinayaa Guddiga Nabadgelyada ee degaanka qaadka lagu qabtay waxaana loo isticmaalayaa dabar-goynta qaadka.

Qod. 3aad

Ciidammada Nabadgelyada, Ciidammada Qalabka Sida iyo Hay'ad kasta ee door weyn ka qaadata dabar-goynta qaadka waxaa la siinayaa abaal-gud gaar ah.

Qod. 4aad

Qofkii soo sheega ama gacanta ku dhiga dembi qaad waxaa la siinayaa abaal-gud dheeri ku ah midka ku tilmaaman Xeerka-sharci lambar 4 ee 10ka Maajo 1984.

Qod. 5aad

Abaal-gudku wuxuu noqon karaa Billad, Ammaan, Dallacaad ama lacag qof, Gobol, Degmo ama Hay'ad la siiyo.

Qod. 6aad

1. Gobol kasta wuxuu yeelanayaa lacag gaar ah oo loogu tala galay abaal-gudka dabar-goynta qaadka.

2. Abaal-gudka lacagta ee ku tilmaaman qodobka hore waxaa bixinaya Gobolka waana lacagta ka soo gasha danuubta qaadka.

Qod. 7aad

1. Qof kasta oo lagu tuhmo in uu qaad soo geliyo Dalka, ka ganacsado ka dullaalo ama taakuleeyo soo gelintiisa ama ganacsigiisa, Guddiga Nabadgelyada ee Degmadu wuxuu ka qaadi karaa tillaabo badbaado ah.

2. Tallaabada badbaadadu waxay noqon kartaa:-

a) Digniin;

b) Saacado xaddidan oo la-tuhmuhu uu iska xaadiriyo Saldhigga Booliska, maalin walba, ama haddii tuhmadu ay culus tahay;

t) Dhaqdhaqaaqiisa oo lagu xaddido magaalada, Xaafadda, Beesha ama tuulada uu deggan yahay ilaa (3) bilood.

3. Haddii uu ku xad-gudbo go'aanka Guddiga Nabadgelyada ee faqradda hore ku tilmaaman waxaa la xiri karaa muddo u dhexeysa 3 ilaa 6 bilood waxaana xad-gudubkaas go'aan ka gaaraya Guddiga Nabadgelyada ee Degmadu.

Qod. 8aad

Qofkii dembi qaad ah ku gala Gaadiid Dawladeed ciqaabta xarigga iyo midda ganaaxa ahba waa loo laba jibbaarayaa.

Qod. 9aad

Qof kasta oo wax ku noqda, isagoo gudanaya waajib la xiriira daba-gaynta qaadka, waxaa loo aqoonsanayaa qof wax ku noqday goob dagaal, wuxuuna yeelanayaa xuquuq la siman midda ay leeyihiin Ciidanka goobta dagaalka wax ku noqda.

Qod. 10aad

Waxaa la baabi'iyay Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Xeerkan Sharci.

Qod 11aad

Xeerkan Sharci wuxuu dhaqan gelayaa 17ka Jennaayo 1986, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda. Isla markaas waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 2 Feb. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)



MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay uu lambarkiisu ahaa 16362 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 3.152.20/= uu iska lahaa Maxamed Cali Abati sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay ——— Taariikhdeeduna tahay 27.1.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 16362 ee ku qoran Maxamed Cali Abati ayna ku jirto Sh.So. 3.152.20/=.

WUXUU FARAYAA

InBankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Saddexaad u baabiiso Baagga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah lagu keenin.

Muqdisho, 30.1.86

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 49

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

UJ:- Baafin J/W. ee Lam. 0202978
Guddoomiyaha Max. G. Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Caddayn Jeegga War. ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Burco ee 1.2.86;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, 65,-) Lumid Jeegga Wareega ee Lam. 0202978 kuna qoran Jaalle Cabdillaahi Cali Maxamed kuna jirtay Sh.So. 50.000/= lagana sameeyey L. Burco Tr. 5.1.86;

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusbooneysiiyo Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan Jaalle Cabdillaahi Cali Maxamed marka ay ka soo wareegot muddo 20 casho gudahood ah laguna Shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga Cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Cabdillaahi Cali Maxamed iyadoo la sugayo mudda kor ku xusan.

BURCO, 4.2.86

Guddoomiyaha Max. G. Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Max. G. Togdheer Burco
(Jaamac C. Bille)

L. 50



MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJ:- Baafin Laba Jeeg War. Lam. 0401556 Sh. So. 100.000/= ee 26.1.86, Jeeg War. L. 0401276 Sh.So. 100.000/= ee 22.1.86.
(Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Caddayn Jeegagga Wareega ee lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, 65) Lumid Jeegagga Wareega ee lam. 0401556, ee 26.1.86 iyo J/W. 0401276 ee 22.1.86 mid walba lacagtiisu tahay 100.000/= ayna ku kala qoran yihiin Jeegga 1aad Maxamed Ismaaciil Cabdi L/Hargeysa, kan labaadna Cabdullaahi Ismaaciil Cali, uuna ka lumay Jaalle Caasha Saciid Yuusuf;

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusbooneysiiyo Jeegaggaas Wareega ee kor xusan Jaalle Caasha Saciid Yuusuf, markii ay ka soo wareegto muddo 20casho gudahood ah laguna shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Xamar.

WAXAA LAGA CODSADEY

In Jeegaggaas cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Caasha Saciid Yuusuf, iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

BURCO, 4.2.86

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco
(Xaliimo X. Cabdi Aadan ) (Tanza'nia)

L. 51

WARSHADDA MARMARKA (ISMA)

Waxaa dhammaan Saamilaydda Warshadda Marmarka la Ogeysiinayaa inay ka soo qayb galaan fadhi caadi ah oo lagu qaban doono Xarunta Warshadda Maalinta Talaadada ee 18ka Febraayo 1986- Saacadda 4.30 Galabnimo.

FADHIGAAS OO LOOGA HADLI DOONO

1) Miisaaniyadda Sannadka 1985;

2) Wixii kale ee soo raaca.

MAAMULAHA WARSHADDA
Dr. Xasan Xaaji Cilmi

L. 52



MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

UJEEDDO:- Digireeto Cusbooneysiin Jeegga Wareega ee Lumay Lambarkiisu yahay 633978 ee Taariikhdiisu tahay 2.11.85 ee Lacagtiisu dhan tahay 6,500/= Shillin ku qoran P.P. SHARMA.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay P.P. SHARMA, ee ku taariikheysan 13.1.86 uuna ku Codsanaayo in loo Cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee ulmay Lambarkiisu kor ku qoran yahay;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, Lambarkiisu yahay 0095 ee ku Taariikheysan 19.1.86, laguna soo Caddeeyey Jeeggaas Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, Lambarkiisu yahay 633978 ee Taariikhdiisu tahay 2.11.85 Lacagtiisu tahay 6,500/= Shillin;

MARKUU ARKAY: Qodobbada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal Gareeyo Jeegga Wareega ee lumay Lambarkiisu yahay 633978 ee Lacagtiisuna dhan tahay 6,500/= Shillin ee taariikhdiisu tahay tan sare ku qoran loona Cusbooneysiinaayo Jaallaha iska leh lacagta Jeeggaas kuna qoran oo ah P.P.SHARMA, Cusboonaysiintana Gacanta laga saaro Jaallahaas ama Ciddii Awood ka haysata muddo 15 Maalmood Gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D.S.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si Ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee lumay ee kor lagu kansal Gareeyey uga soo qortaan Cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 21.1.86

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

L. 53

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

UJ:- Baafin Jeegag Lumay:-

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco

HADDUU AR,KAY: Dacwadda ku saabsan Jeegagga Wareega ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco Tr. 10.2.86;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65,) Lumid Jeegagga Wareega ee kala ah: 1) 0471109 Sh.So. 100,000 ee Tr. 4.2.86, 2) 0471110 Sh.So. 100,000 ee Tr. 4.2.86, 3) 0471112 Sh.So. 100,000 ee Tr. 4.2.86 kuna qorayd Jaalle Raxma Maxamuud Maxamed lagana sameeyey L. 3aad Muqdisho.

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusbooneysiiyo Jeegaggaas Wareega ee kor ku xusan markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho ah laguna Shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Xamar.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la samayndoono gacanta laga saaro Jaalle Raxma Maxamuud Maxamed iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

BURCO 10.2.86

Guddoomiyaha Max. G. Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco
(Jaamac Cabdillaahi Bille)

L. 54



WASAARADDA HOWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYN.
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdifataax Xuseen iyo Buuwe Cali Dheere ay ku soo weydiisteen arjiga taariikhdiisu aheyd 2.7.1980 gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmada Wardhiigley, qaabkiisuna yahay Rett. addimihiisu yihiin 50X100 kuna fadhiya 5.000/= mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Waddo. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 18/W. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul Lamb. 15/W. |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhhul Lamb. 19/W. |

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda SAHANKA & DEG. MAG. ee Wasaaradda Howlaha Guud, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Soddon maalmood oo laag bilaabo maalintii lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 7 Apr. 1984

Agaasimaha M/Dhulka Rasmiga ee D/Hoose
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 55

WARSHADDA DANTA DALKA

OGEYSIIS; FADHI MUHIIM AH.

Ayadoo la tixgelinayo Sharciga u degsan Shirkadda Danta Dalka, waxaa la ogeysiinayaa xubnahaas oo kala ah; Cabdullaahi Faarax Maxamed iyo Maxamed Xaashi Ijdle, in muddo ku siman 15 casho ay ku yimaadaan Saldhigga Shirkadda AL — NAJAAX, si ay u dhameystiraan shuruudaha xubinimo ee la doonayo, Haddii ay muddadaas ku iman waayaan kuna xallin wxyaan arrimahaas la xiriira Sharikadda, waxaa looga tala galayaa in ay ka bexeen Shirkadda.

Muqdisho. 5ta Feberaayo 1986

GUDDOOMIYAHA IDMAN
Salaad Cali Siyaad

L. 46